


Miisaaniyadda 2026 ee la soo jeediyey iyo canshuurta guryaha ee Ismaamulka Washington waxay taageerayaan bixinta adeegyada dowladda fadaraalka iyo tan gobolku ay qasab ka dhigaan, iyo sidoo kale hawlaha aasaasiga ah ee dowladda gobolka. Miisaaniyadda waxaa saamaynaya korodhka dadka, baahida sii kordhaysa ee adeegyada, iyo qiimaha sii kacaya ee alaabaha iyo adeegyada.

Ka qaybgal kulanka dadweynaha ee ku saabsan miisaaniyadda gobolka ee 2026, kaas oo ka qabsoomi doona 6 galabnimo. Diseembar 2, gudaha qolka guddiga ee Government Center, 14949 North 62nd Street in Stillwater.

2026 Canshuurta Lasoo Rogay


6.95%
Korodhka



Cashuurta lasoo rogay ee gobolku waxay ka mid tahay saddexda ugu hooseeya ee 87-da ismaamul ee Minnesota.

Saameynta Canshuurta ku yeelanayso Dadka guryaha leh

Qiyaasta saameynta canshuurtu ku yeelanayso guryaha la degan yahay ee kala duwan, iyadoo lagu salaynayo isbeddelka dhexdhexaadka ah ee 1.7% qiimaha hantida la degan yahay laga bilaabo 2025 ilaa 2026.



Qoondaynta Canshuurta Guryaha

Canshuurta lagu soo rogay guryaha ismaamulku waxay gaaraysaa **20 santi** halkii doolar ee kasta oo lagu bixiyo canshuuraha guryaha, taasoo lagu maalgalinayo adeegyada ismaamulka. Inta soo hadha oo ah **80 santi** waxa loo dirayaa **canshuuraha degmooyinka kale**.



Ismaamulka 20c

Dugsiyada 41c

Magaalooyinka Waaweyn/
Var-yar 29c

Gobolka 5c
Kuwu kale 4c
TIF 1c

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan miisaaniyadda ismaamulka



WashingtonCountyMN.gov/Budget

AAA
Qiimeynta Daynta

Ismaamulka Washington, Minnesota, waa mid ka mid ah shanta ismaamul ee Minnesota iyo mid ka mid ah 87-da gobol ee dalka oo dhan oo leh qiimeyn amaah saddex-A ah oo ay si wadajir ah u bixiyaan hay'adaha qiimeynta S&P iyo Moody.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan canshuurta gurigaaga



WashingtonCountyMN.gov/PropertyTax

Muxuu Ismaamulka Washington u fidiyaa bulshada?



Maktabada

Maktabadda waxa ka go'an dhiirrigelinta xiisaha waxbarasho, horumarinta hal-abuurnimada, iyo kobcinta fursadaha. Tan waxa ay ku gaadhsiiyaan adeegyada laga bixiyo sideeda laamood ee maktabadaha gobolka, iyo sidoo kale kheyraadka sii kordhaya ee internetka.



Xaafiiska Booliska Ismaamulka

Xafiiska Booliska Ismaamulku wuxuu roondeeyaa waddooyinka ismaamulka, wuxuu baadhitaan ku sameeyaa dambiyada, wuxuu u adeega oo taageeraa nidaamka sharciga, wuxuu ilaaliyaa in uu ahaado deegaan ammaan ah xabsiyadu, wuxuuna kor u qaadaa badbaadada bulshada iyada oo loo marayo kaqaybgalka bulshada.



Goobaha Nasashada/Goobaha Dadweynuhu ku shaqaysanayaan

Qorshaha goobaha bulshadu ku shaqaysato, waxay dhisaan, oo ilaaliyaan waddooyinka, biriishyada, iyo dhismayaasha ismaamulka. Waaxdu sidoo kale waxay kormeertaa 10-ka goobood ee nasashada iyo hawlaha kale, oo ay ku jiraan Historic Courthouse oo ku yaala Stillwater.



Adeegyada Bulshada

Adeegyada Bulshada waxay la shaqeeyaan hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay si ay uga caawiyaan dadka iyo qoysaska inay horumaraan oo guul u gaadhaan. Waxay bixisaa adeegyo kala duwan, sida ilaalinta carruurta, caawinta ku-tiirsanaanta daawooyinka, adeegyada mujaahidiinta, iyo adeegyada maaliyadda iyo shaqaalaysiinta.



Caafimaadka Dadweynaha & Deegaanka

Waaxda Caafimaadka Dadweynaha iyo Deegaanka waxay bixisaa adeegyo lagu ilaalinayo, lagu horumarinayo, laguna wanaajinayo caafimaadka bulshada iyo deegaanka. Waxay maamushaa barnaamijyo caafimaad si loo dhiirrigeliyo caafimaadka bulshooyinka. Waxay la shaqaysaa Xarunta Ilaalinta Deegaanka waxayna isku dubariddaa adeegyada dib u meertaynta.



Diwaanada Guryaha iyo Adeegyada Canshuur Bixinta

Waaxda Diiwaangelinta Guryaha iyo Adeegyada Canshuur-bixiyeyaasha waxay bixisaa adeegyo la xidhiidha canshuuraha, qiimeynta hantida, diiwaangelinta, diiwaanka dhulka, liisamada, iyo doorashooyinka ee dadka deggan Ismaamulka Washington.



Adeegyada Dhaqancelinta Bulshada

Adeegyada Dhaqancelintu waxay bixiyaan kormeerka cafiska iyo xabsi kasiid daynta iyo kaalmo-siinta dadka waaweyn iyo dhallinyarada ka tirsan bulshada. Kormeerka ku saleysan bulshada waa aalad wax ku ool ah oo lagu gaadhi karo badqabka dadweynaha iyadoo si mas'uuliyad maaliyadeed leh loo maamulayo.



Garyaqaanka Ismaamulka

Xafiiska Garyaqaanka Ismaamulka wuxuu bixiya dacwad oogista dambiyada ismaamulka, wuxuu u adeega sidii la-taliye sharci oo u qaabilsan arrimaha maamulka, wuxuuna bulshada siiyaa adeegyo ka hortagga dambiyada.



Shaqaalaha Bulshada

Xafiiska shaqaaluhu wuxuu ka caawiyaa ismaamulka soo jiidashada iyo haynta shaqaalaha tayada shaqaalaha. Wuxuu shaqaalaysiiyaa asagoo raacaysa mabaa'diida fursadaha shaqa ee sinnaanta, waxayna u shaqaysaa inay tahay xarunta dhexe ee xidhiidhka shaqaalaha, xidhiidhaha shaqaalaha iyo maamulka, iyo maaraynta khataraha.



Macluumaadka Tiknoolajiyada

Tiknoolajiyadu waxay hagtaa ismaamulka iyadoo loo marayo adeegyo farsamo oo tayo sare leh oo wax ku ool ah, isla markaana waxtar leh iyo xalka kor loogu qaadayo gaadhsiinta adeegyada iyo barnaamijyada.



Xisaabaadka iyo Maaliyadda


Xisaabaadka iyo Maaliyadda waxay maamushaa khayraadka maaliyadeed ee ismaamulka si loo hubiyo hufnaan, isla xisaabtan, iyo maarayn wax ku ool ah oo waxtar leh oo lagu sameeyo lacagaha dadweynaha. Tan waxa ku jirta kormeerida hawlaha ganacsi, ururinta, baahinta, iyo maaliyadda hantida.



Maamulka

Xafiiska Maamulku wuxuu hogaaminayaa fulinta go'aanada, siyaasadaha, xeerarka, iyo qaraarada Golaha Guddiyada, wuxuuna bixiya macluumaad iyo tilmaamo ka caawinaya masuuliyiinta la doortay inay gaadhaan go'aanno muhiim ah oo ku saabsan adeegyada hadda iyo mustaqbalka.

Sidee ayuu gobolka u kharash gareeyaa qaybtiisa canshuurta guryaha?



- Dhisida Waddooyinka Waaweyn iyo Dayactirkooda **31%**
- Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka **23%**
- Dawladda Guud **11%**
- Bixinta Daymaha **4%**
- Badqabka Dadweynaha **18%**
- Guryaha iyo Canshuuraha **3%**
- Kharashka Hantida Maguurtada ah ee Kale **3%**
- Maktabadaha iyo Goobaha Nasashada **4%**
- Macluumaadka Tiknoolajiyada **3%**